

X. M. J. ee 14 Febraayo 1961, lamba. 79.

Magacaabista Joogtada ah, ee Jamhuuriyadda Soomaaliya fadhiya Qarumaha Midoobay.

MADAXWEYNAHA KU MEEL GAARKA EE JAMHUURIYADDA

Markuu arkay Qodobka 87, ee Dastuurka;

Markuu arkay sharciga 20 Setembere 1960, lamba. 4;

Markuu arkay Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda, ee 7 Febraayo 1961, lamba. 41084/R, ee UU diiwaangeliyey Hantidhowrka, 11^{kii} Febraayo 1961 - Diiwan lamba. 5, xaashi lamba. 21;

Markuu dhegeystay Golaha Wasiirrada;

Asaga oo ku saleynaya

Soojeedinta Wasiirka Arrimaha Dibedda;

WUXUU XEERINAYAA

Qod. 1

Jaalle Xasan Nuur Cilmi waxaa loo magacaabay Wakiilka (Ergeyga) Jamhuuriyadda Soomaaliya u fadhiya Qarumaha Midoobay, asaga oo yeelanaya jagada iyo derejada Safiir aan Caadi ahayn, oo Awood Buuxda leh.

Qod. 2

Xeerkan waxaa loo gudbinayaa Hatidhowra, si uu u diiwaangeliyo.

Muqdisho, 14 Febraayo 1961.

Adan Cabdulle Cusmaan

Wasiirka Kowaad

Cabdirashiid Cali Sharmarke

Wasiirka Arrimaha Dibadda

Cabdullahi Ciise Maxamed

Waa arkay waana diiwaangeliyey – Diiw. lamba. 5, xaashi Imba. 110.

Muqdisho, 23 Febraayo 1961.

Hantidhowraha: **Axmed Dahir**